Mulkiilaha gurigaada ma wuxuu rabaa in uu kaa saaro?

Gobolka Ontario gudahiisa, badanaa waa sharci darro in mulkiilaha gurigaada uu kaa saaro ayada oo uusan Guddiga Mulkiilayaasha iyo Kireystayaasha/Ijaartayaasha (Landlord and Tenant Board) soo saarin "go'aanka ah guri ka saariddaada" (eviction order). Guddigan wuxuu u taaganyahay sida maxkamad gaar ah oo xallisa khilaafka ka dhaxeeyo mulkiilayaasha guryaha iyo kireystayaasha. Qoraalkan, ereyga "Guddi" waxaa loola jeedaa Guddiga Mulkiilayaasha iyo Kireystayaasha.

Mulkiilaha waa in uu raaca tallaabooyin sharciga waafaqsan si uu u helo amarka guri ka saaridda. Mulkiilahaada waa in uu guddiga ka qanciyo in uu jiro sabab sharciga waafaqsan oo uu kaaga saari karo guriga. Sharci ahaan, waxyaabo qaarkood oo kali ah ayaa qof guri looga saari karaa, sida ayadoo guriga qeyb laga burburiyo ama ayadoo la bixinin kirada guriga.

Xogta baalalkan ku qoran way ku khuseysaa xitaa haddii aad deggantahay guryaha dowladda, ama haddii kirada lagaa caawiyo ama kiradaada ay ku saleysantahay dakhligaada.

Laakiin xaaladaha qaarkood qodobkan <u>ma</u> lagu dabaqi karo, sida:

- **haddii aad deggantahay meel ganacsi loogu tala galay,**
- **haddii aad jikada ama musqusha la wadaagtid milkiilaha ama milkiilaha qaraabadiisa,**
- **haddii aad deggantahay guri ku meel gaar ah,**
- **hadii aad guriga la wadaagtid ama aad ka kireysatay kireyste kale,**
- **haddii aad xubin ka tahay iskaashatada guryaha (housing co-operative).**

Haddii uu shaki kugu jiro u tag lataliye sharci yaqaan ah.

Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in aan guuro?

Badanaa, talaabada ugu horeeyso oo uu mulkiilaha kaa qaadi doono waxaytahay in uu ku siiyo warqad qoraal ah oo ku fareyso in aad guriga ka guurto. Ma ku khasbanid in aad guurto, laakiin waa in aad sharci yaqaan la tashataa.

Haddii aadan guurin, talaabada xigta ee uu mulkiilaha kaa qaadi doono waxay tahay in uu codsi u gudbiyo Guddiga Mulkiileyaasha iyo Kireysteyaasha guryaha. Waxaad heli doontaa nuqulka warqadda "Codsiga" (Application) oo uu gudbiyey mulkiilaha iyo warqadda ku qoran "Ogeysiiska Garqaadidda" (Notice of Hearing) oo ku cad taariikhda waqtiga, iyo xarunta lagu garqaadaayo.

Waa muhim in aad tagtaa garqaadiddan. Haddii aadan tagin, adiga oo aanan goobta joogin ayaa garta la galayaa waxayna u badan tahay in Guddiga uu kaa saaro guriga. Waxaa fiican in aad raadsatid latalin sharci inta aan la gaarin maalinta garta la qaadaayo. Haddii aadan Karin in aad garyaaqan qabsatid waxaa ku caawinaayo xafiiska taakuleynta sharciga (community legal clinic).

Haddii uu mulkiilaha guriga uu doono in uu kaa saaro, waxaa laga yaabaa in aad heshid waraaqo badan. Haddii aad fahmi weydo ama ay dhib kuugu tahay in aad akhrisatid waraaqaha waxaad tustaa cid kaa caawiso. Waxaa laga yaabaa in aad si deg-deg ah u qaadid talaabo sharci ah, si aad iskaga joojisid guri ka saaridda lagugu soo oogay.

Maxaa ka dhacidoono maxkamada?

Marka dacwaada la qaadaayo, xubin guddiga ka mid ah, ayaa dhageysanayo sababta uu mulkiilaha u doonaayo in uu guriga kaaga saaro, iyo sababta aay adigu kuula tahay in aanan laagaga saarin guriga.

Xubinta guddiga dhageysaanaayo dacwada wuxuu gaaraaya go'aan isla markiiba ama muddo kadib. Go'aankan waxaa la yiraahdaa "amar" (order). Nuqulo amarka la bixiya ayaa adiga iyo mulkiilahaba loo soo diri doonaa.

Mararka qaar waxaad heshiis la gaari kartaa mulkiilaha si loo joojiyo guri ka saaridda. Heshiiska noocaan ah waxaa inta badan la yiraahdaa "heshiis maslaxo" (settlement). Heshiis waxaa la gaari karaa inta aan amarka la bixinin ama kadib. Isku day in aad la tashatid qareenkaada, inta aadan saxiixin warqadaha. Waxaadna ka qaadataa nuqul warqad kasta oo aad saxiixdid.

➥bogga 2aad warar kale ayaa ku qoran➥

Guddiga wuxuu bixin karaa amar ka saarid guri waqti kasta xitaa haddii la joogo xilliga qaboobaha.

Xitaa haddii uu guddiga soo saaro amar guri ka saarid ah, waxaad weli awood u leedahay in aad joojisid guriga in lagaa saaro. Islamarkiiba doono taakuleyn sharci ah.

Guriga ma leyga saari karaa iyada oo aan dacwadda la dhageysanin?

Xaaladaha qaarkood, Guddiga wuxuu bixin karaa amar guri ka saarid ah, iyadoo aan dacwada la dhageeysanin. Haddii ay taasi dhacdo, in aadan ka warqabin ayaa laga yaabaa, ilaa uu guddiga kuu soo diro nuqul amarka ku aadan. Markaa waa in aad si deg-deg ah u fal-gashid si aad u joojisid amarka guri ka saaridda ah. Isla markiiba doono taakuleyn sharci ah.

Maxaa dhacaaya haddii amarka guri ka saaridda la joojin waayo?

Waa in aad guriga ka guurtid maalinta uu Guddiga kuu qabtay. Haddii aadan guurin, mulkiilaha guriga wuxuu arrinta gaarsiin karaa ruuxa loo yaqaano "Sheriff" si uu kaaga saaro.

Sheriifka waa qofka keliya oo loo ogolyahay in uu qasab kaaga saaro ama guriga kaa qufulo.

Waxaase sharci darro ah in tan oo kale ay sameeyaan, mulkiilaha, waardiyaha am qof keleba. Mulkiilaha guriga ma beddeli karo qufulka guriga ilaa uu Sheriifka ka yimaado oo uu ogolaado in qufulka la beddelo.

Maxaa ku dhacaya alaabteeyda?

Haddii uu Sheriifka guriga kaa saaro, waxaad leedahay 72 saac si aad u qaadatid alaabtaada, xitaa haddii ay ku aado maalmaha fasaxa ah (Sabti iyo Axad) ama maalin ciid ah. Muddadan 72 saac ah mulkiiluhu waa in uu alaabtaada kuugu xafidaa guriga dhexdiisa ama meel u dhow, uu na kuu ogolaadaa in aad qaadatid inta u dhexeysa 8 da subaxnimo ilaa iyo 8 fiidnimo.

Shaciyadan waxay wax tarayaan marka uu Sheriiffoowga guriga kaa saaro oo keliya. Xalad kasta oo kale oo kuugu timaado waa in aad alaabtaada qaadatid marka aad guureysid. ❖

Xaashiyahan waxay ku siinayaan xog guud oo keli ah. Waa in aad heshid talo sharci ah ee quseeya xaaladaada guryaha oo kuu gaarka ah.

Xogtan waxay ku qoran tahay af soomaali waxaana laga tarjumay nuqul Ingiriisi ah. Haddii aad fahmi wayso, fadlan u noqo nuqulka afka Ingiriisiga ah.

Sida loo helaa taakuleyn

Findhelp waa urur bulsho oo dadka caawiyo kuna hadlo luqado badan. Waxaad wici kartaa 24ka saac maalin walba, 7 maalmood ee usbuuca.

Waxay kuu tilmaamayaan:

- Sida aad ula xariiri laheyd xafiiska taakuleynta arrimaha sharciga,
- Meelo kale ee aad ka helaysid taakuleyn sharci ah iyo xog waran, iyo
- Sidii aad ula xariiri laheyd hay'adaha bulshada ee u qaabilsan dejinta, ama hay'ado kale oo u qaabilsan taakuleyn kale.

Findhelp kala xiriir:

☎ Lacag la'aan ah
(Toll-free) **1-866-667-5366**

☎ Lacag la'aan ah ee dadka maqalka ka dhibaateeysan
(Toll-free TTY)..... **1-888-340-1001**

💻 **www.211ontario.ca**

Caawinaado kale:

Waxaa soo diyaariyey CLEO (Community Legal Education Ontario/Éducation juridique communautaire Ontario) iyagoo ay kala shaqeyeen CLEO Six Languages Advisory Group, oo ka kooban 10 hey'adood oo xubin ka ah.
Mashruucaan waxaa maalgaliyey Ontario Trillium Foundation iyo Legal Aid Ontario.
CLEO waxey Findhelp uga mahad celinaaysa caawinaada teleefoonka oo ay mushruucaan ka geeysteen.
Booqo **www.cleo.on.ca** si aad bogogaan iyo warar kale ugula soo baxdid.